

Xeeri-Sharci Madaxweyne 19 Agoosto 1962, lamba. 196.

Kordhinta xubnaha Guddiga Qorshaynta iyo Isku-dubbaridka horumarka dhaqaale iyo bulsho ee Jamhuuriyadda.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda

Markuu arkay qod. 85 ee Dastuurka;

Markuu arkay Xeer-Sharci Madaxweyne 28 Oktoobar 1961, lamba. 261, ee ku saabsan aasaasid Guddiga Qorshaynta iyo Isku-dubbaridka Horumarinta Dhaqaalaha-Bulshada ee Jamhuuriyadda;

Markuu arkay D.P.R. 6 Decembar 1961, lamba. 295, oo ku saabsan inta uu ka kooban yahay Guddiga sare ku xusan;

Markuu tixgelinayna baahida loo qabo in la balaariyo qaabka uu u dhisan yahay xubnaha guddiga aan kor ku soo xusnay, iyadoo xubnaha lagu soo dari doono wakiillo ka kala socdo Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo mid ka mid ah Wasaaradda Gaashaandhigga;

Markuu Dhageystay Golaha Wasiirada;

Markuu arkay soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha;

Wuxuu xeeriyay:

Qod. 1

Waxaa ka mid noqon doono Guddiga Qorshaynta iyo Isku-dubbaridka Horumarinta Dhaqaalaha iyo Arrimaha Bulshada ee Jamhuuriyadda, ka sakow dadka ku xusan Xeerka-Sharci ee Madaxweynaha. 6 Decembar 1961, lamba. 295:

— wakiil ka socdo Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo uu soo magacaabay Wasiirka Arrimaha Gudaha;

— iyo wakiil ka socda Wasaaradda Gaashaandhigga oo uu soo magacaabay Wasiirka Gaashaandhigga.

Qod. 2

Xeerkan ayaa wuxuu dhaqan galayaa maalinta xigta maalinta lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, Agoosto 19, 1962.

Aden Abdulla Osman

Ra'iisul wasaaraha

Cabdi-Rashiid Ali Shermarke

Arkay oo ku diiwaan gashan - Reg. lamba. 2, xaashida lamba. 22. Muqdisho, 30 Agoosto 1962.

Garsooraha Maxkamadda: **Axmed Daahir**